FEDERAALAYNTA HAY'ADAHA AMNIGA IYO BAARISTA

QAREEN SAKARIYE I. NUUR

Dec. 2022

TUSMADA

1. Gogoldhig: 2
2. Sooyaalka Hay'daha Amniga Dalka 3
3. Federaalaynta Hay'adaha Amniga 3
   3.1. Ciidanka Xoogga 4
   3.2. Sirdoonka 4
   3.3. Ciidanka Asluubta iyo Xabsiyada 5
   3.4. Ciidanka Booliska 6
   3.5. Qaabdhismeedka Booliiska dawladaha federaalka ah: 8
      3.5.1. Dalka Bakistaan 8
      3.5.2. Dalka Nayjeeriya 10
4. Federaalaynta Hay'adaha Baarista 11
   4.1. Hay'adda Sirdoonka 11
   4.2. Xafiiska Hanti-Dhawrka Guud ee Qaranka 12
   4.3. Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID) 13
5. Wakaaladaha Amniga iyo Baarista ee Dalalka Federaalka ah 14
   5.1. Hay'adda Amniga vs Booliska Dharcadda ah 15
   5.2. Xafiiska Dembi Baarista Federaalka ee Maraykanka (Federal Bureau of Investigation) 16
      5.2.1. Qaab-dhismeedka iyo Waajibaadka 17
      5.2.2. Dembiyada uu Baaro Xafiiska 17
      FBI waxaa hrtebinta ugu weyn u leh: 19
   5.3. Wakaaladda baarista Federaalka ee Bakistaan (Federal Investigation Agency Bakistaan) 19
      5.3.1. Qaybaha wakaaladda 19
      5.3.2. Xilka iyo shaqada waaxaha 20
6. Gunaanadka 21
7. Talo Soo Jeedin 22

Tixraac: 25

1. Gogoldhig:

Soomaaliya waxa ay lahayd dawlad dhexe oo ay Hay'adaheeda Amnigu yihiin kuwa midaysan ayna maamusho dawladda dhexe. Waxaa Hay'adaha Amniga ka mid ah: Ciidanka Xoogga Dalka, Ciidanka Booliska, Ciidanka Asluubta iyo Nabad Sugidda Qaranka. Waxa ay sidaa oo kale lahayd hay'ado u xilsaaran baarista dembiyada oo ay ka mid yihiin: Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID), Nabad Sugidda Qaranka iyo Xafiiska Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka.

Waxa uu dalku ka guuray nidaamkii dalwadda dhexe (centralized government), isaga oo qaatay nidaamka federaalka oo awooddii dalwadda u qeybibiyey heerar kala duwan. Nidaamka federaalka waa mid ka mid ah hannaanka daadejinta awoodda iyo adeegga, waxaana awooddii dawladda loo qeybinnayaa saddex heer oo kala ah dawlad dhexe, dawlad goboleed iyo dawladaha hoose. Qodobka 48 ee Dastuurka KMG ayaa nidaaminaya qaabdhismeedka dawladda, waxa uuna u qaybinayaa sidan*: "*Qaab-dhismeedka Dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu ka kooban yahay 2 heer dawladeed: (a) Heerka xukuumadda federaalka (b) Heerka dawladaha xubinta ka ah dawladda federaalka oo ka kooban xukuumadda ka tirsan dawladaha federaalka iyo dawladaha hoose". Halka Qodobka 1 ee DKMG ah uu dhigayo in Soomaaliya tahay Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah oo ku dhisan matilaadda dadweynaha loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka Xisbiyada badan iyo caddaalad bulshadeed.

Isbeddelka nidaamkii dawladeed ee dalku wuxuu saameeyay dhammaan hay'adaha dawladda oo ay ku jiraan hay'adihii Xeerdejinta, Fulinti iyo Garsoorka. Waxa ay daraasaddan koobani ifineysaa hay'adaha amniga iyo baarista dembiyada ee uu dalku lahaan jiray, isbeddelka ku yimid hay'adahaas kolkii la qaatay nidaamka federaalka, hannaanka federaalaynta hay'adaha amniga iyo kuwa baarista, habka ay u shaqeeyaan hay'adaha amniga iyo kuwa baarista ee dalalka ku dhaqma nidaamka federaalka, gunaanad iyo talo soo jeedin aan ku ebyo doonno daraasadda.

2. Sooyaalka Hay'daha Amniga Dalka

Soomaaliya waxa ay leedahay ciidanka qalabka sida oo ka kooban Ciidanka Xoogga, Ciidanka Booliska, Ciidanka Asluubta iyo Hay'adda Nabadsugidda. Ciidamada qalabka sida waxay u xilsaaran yihiin damaanad-qaadidda nabadda, ammaanka, gobannimada, midnimada qaranka, badbaadinta shacabka, ilaalinta sirta Qaranka iyo difaacidda Jumhuuriyadda Soomaaliya.

Kolkii gumaystaha reer galbeedku qabsaday dhulka Soomaalida waxay sameeyeen ciidamo boolis ah oo iyaga u adeega, waxaana markii ugu horreysay la dhisay ciidankaas 1948, hase yeeshee waxaa si rasmi ah boolis ahaan loogu aqoonsaday 1927, waqtigaas ayaana loo bilaabay tababarro iyo aqoon kororsiyo. Waxaa ciidankaas loo yeeri jiray magacyo kala duwan oo ay ka mid yihiin: Ciidanka Owrta, Ciidanka Xeebaha oo loo yaqiinay kuwii Goblllada Woqooyi ee uu Ingiriisku gumaysanay, halka Gobollada Koofureed ee Talyaanigu gumaysan jiray looga yeeri jiray Sabatiye.

Waxaa ciidanka xoogga dalka si rasmi ah loo aasaasay April 12, 1960-kii; halka ciidanka Booliska loo asteeyay aasaaskooda December 20, 1943.

Ciidanka Asluubta waxaa la aasaasay Feberaayo 22, 1970. Hay'adda nabad sugidda umadda oo kolkii hore ku dhexjirtay ciidanka booliska iyo ciidanka xoogga dalka, laga dhigay hay'ad madaxbannaan, laguna dhisay Xeer L.14 ee soo baxay 15 February 1970.

3. Federaalaynta Hay'adaha Amniga

Sida aan sare ku xusnayba, hay'adaha amniga dalka waa: Ciidanka Xoogga Dalka, Ciidanka Booliska, Ciidanka Asluubta iyo Hay'adda Nabadsugidda. Nidaamka federaalka ee la qaatay, wuxuu saameeyay shaqada hay'adaha amniga dalka, sidaas oo kale hay'adaha baarista, sidaas awgeed, waxaan dul istaagi doonna hay'adaha difaaca iyo kuwa amniga ee uu dalku lahaa iyo sida uu u saamaynayo nidaamka federaalka, waxaan sidaas oo kale soo qaadan doonna hannaanka ay u shaqeyaan hay'adaha amniga iyo kuwa baarista dalalka haysta nidaamka federaalka.

3.1. Ciidanka Xoogga

Ciidanka xoogga wuxuu ka kooban yahay ciidanka dhulka, badda iyo cirka. Wuxuu u xilsaaran yahay difaaca dalka, ilaalinta madaxbannaanida iyo midnimada qaranka. Dawladda federaalka oo kaliya ayaa leh hoggaaminta iyo maamulka ciidanka xoogga, wuxuuna si toos ah u hoostagayaa Wasaaradda Gaashaadhigga Federaalka.

Dalka ku dhaqma nidaamka federaalka iyo dunida kalaba waxay ka midaysan yihiin in qaranku yeesho hal ciidan xoog oo u taagan difaaca dalka. Qod. 54 ee Dastuurka KMG ee ka hadlaya awood qaybsiga ayaa si cad u tilmaamaya in dawladda federaalka ay yeelanayso awoodaha iyo mas'uulyadda difaaca qaranka.

3.2. Sirdoonka

Hay'adda Nabad-sugiddu waxay u xil-saaran tahay uruurinta iyo falanqaynta xogaha sirta ah ee wax-tarka u leh amniga qaranka, ciidamada iyo ujeedooyinka siyaasadda dibadda ee dalka. Sooyaalka Sirdoonka ama nabadsugida Soomaaliyeed waxa uu soo maray heerar kala duwan, wixii ka horreeyay 1970 wuxuu ahaa qaybo gaara oo ka kala tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliya iyo Ciidanka Xoogga Dalka. 1970 ayaa laga dhigay hay'ad madaxbannaan, waxaana lagu dhisay Xeer Lr.14 ee soo baxay 15 Febraayo 1970. Kolkii dawladdi dhexe burburtay, waxaa isbeddel ku yimid magaci iyo shaqadi hay'adda, wuxuuna dastuurku ku magacaabay Nabadsugidda Qaranka (NISA). Waxaa haatan hay'adda loogu yeeraa hay'adda nabadsugidda iyo sirdoonka qaranka, hase yeeshee ma jiro sharci aqoonsan ama lagu dhisay hay'ad leh magacaas, sidaas darteed sharci ahaan ma jiri karto hay'ad iska abuuran karto magac aanu sharcigu u bixin.

Hay'adaha sirdoonku waxa ay si toos ah u hoostagaan dawladda federaalka, walow ay dawlad goboleedyadu yeelan karaan hay'ado amni oo xogaha aminiga deegaannadooda uruuriya. Shaqada hay'adda sirdoonku waa uruurinta xogaha sirta ah iyo la socodka khataraha lidka ku ah amniga qaranka, waxayna wixii xog sir ah u gudbisaa hay'adaha kale ee amniga gudaha iyo madaxda qaranka ee sharcigu tilmaamay in la wadaagaan xogahaas.

Dawladaha adduunku waxay leeyihiin hay'ado sirdoon oo hawshoodu tahay uruurinta sir iyo xogaha kale ee amni, waxaa ka soo qaadan karnaa CIA-da

Maraynkan, Inter-Services Intelligence (ISI) –ta Pakistan, MI5-ta Ingiriiska iyo qaar kaloo badan.

Dastuurka KMG waxa uu tilmaamay in ay jirayso hay'adda nabadsugidda, isaga oo aan wax faahfaahin ka bixin qaabdhimeedkeeda iyo awoodaheeda, sidaas oo kale aan sheegin jihada leh mas'uuliyadda iyo maamulka hay'adda iyo haddii uu dalku yeelanayo hal hay'ad sirdoon iyo haddii kale. Dhammaan dastuurrada dawlad goboleedyada dalku waxa ay dhigayaan in dawlad goboleedku yeelanayo hay'ad ama ciidan nabadsugid iyo sirdoon[1].

3.3. Ciidanka Asluubta iyo Xabsiyada

Ciidanka Asluubta, waxaa xil ka saraan yahay ilaalinta iyo maamulidda Xabsiyada iyo fulinta adeegyada dhaqan-celinta iyo daryeelka maxaabiista Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sida uu dhigayo Qod.126 (1) (d) Dastuurka KMG waxaa ciidamada amniga ka mid ah ciidanka Asluubta. Ciidankaan horay ayuu u jiray, waxaana la aasaasay 22-dii Fabaraayo 1970.

Dhammaan dawlad goboleedyadu waxa ay leeyihiin ciidan asluub ah oo maamula isla markaana ilaaliya Xabsiyada, sida ay tilmaamayaan dastuurradoodu[2]. Kolka laga hadlayo Xabsiyada Dalka iyo Xeerarkooda, waxaa jiray Xeerka sumaddiisu tahay 7 oo soo baxay 30/12/1971 oo loogu yeero Xeerka Xabsiyada Dalka iyo Xeer Lr.49 ee soo baxay 09/08/1984 (Xeer nidaamiyaha Xabsiyada Dalka).

Xeerarkaas ayaa lagu maamuli jiray welina lagu maamulaa Xabsiyada Dalka, waxaana xilka iyo mas'uuliyadda Xabsiyada lahaa dawladda dhexe, iyada oo ay Wsaaradda Garsoorku ay lahayd kormeerka iyo magacaabidda xabsiyada. Sida uu dhigayo Qod.3 Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada: "Markii loo baahdo in meel lagu magacaabo xabsi ama xarun asluubeed Taliyaha Ciidanka Asluubta ayaa Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arimaha Diinta talo ka siinaayo kaas oo isaguna kusoo saari doono decretto ama xeer, kuna dhawaaqayo aas'aaska xabsiga ama hadii ay xarun tahay".

[1] Puntland Qod.86(1)(c). Galmudug Qod.69 (1) (b). Jubbland, Qod.91 (1)(c). Hirshabeelle Qod. 62(1)(b). Koonfur galbeed Qod.83(1)(c).
[2] Puntland Qod.86(1)(d). Galmudug Qod.69 (1) (c). Jubbland, Qod.91 (1)(b). Hirshabeelle Qod. 62(1)(c). Koonfurgalbeed Qod.83(1)(d).

Kolka laga hadlo Xabsiyada, wadamada ku dhaqma nidaamka federaalku waa ay ku kala duwan yihiin, hase yeeshee badankoodu waxay leeyihiin xabsiyo federaal ah oo lagu xiro, laguna dhaqanceliyo maxaabiista u xiran dembiyada federaalka iyo Xabsiyo ay maamulaan dawlad goboleedyada oo lagu xiro, laguna dhaqanceliyo maxaabista u xiran dembiyada dalwad goboleedka.

Dalka Jarmalka: waxaa xabsiyada maamula dawlad goboleedka, mana jiro xabsi heer federaal. Waxaa xabsi kasta kormeera isla markaasna la socda hawlihiisa Wasaaradda Caddaaladda Maamul Goboleedka. Kolkii hore waxaa Xabsiyada maamuli jiray dawladda federaalka, hase yeeshee 2008 ayaa wax-ka-beddel iyo toosin lagu sameeyay xeerka ciqaabta iyo xeerka xabsiyada ee federaalka, kadibna waxaa maamulka xabsiyada la hoosgeeyay dawlad goboleedka, waxaa sharcigaan ansixiyay 3 maamul goboleed, halka inta soo hartay ay weli ku dhaqmaan shuruucda xabsiyada federaalka ee horay u jiray.

Dalka Maraykanka: wuxuu maamulka Xabsiyadu leeyahay saddex heer oo kala ah: heer federaal, heer dawlad goboleed (state) iyo heer dawladaha hoose. Nidaamka Xabsiyada waxaa hogaamiya xafiiska federaalka ee xabsiyada oo hoos taga Wasaaradda Caddaaladda Maraykanka (department of justice). Xabsiyada dawlad goboleedku waxa ay hoostagaan Wasaaradda Caddaaladda Dawlad Goboleedka; halka Xabsiyada deegaannada (counts) ay hoostagaan isla markaasna ay maamusho waaxda Golaha Deegaanka (County Sheriff's Office).

Dalka Hindiya: dawlad goboleedka ayaa leh maamulka iyo masuuliyadda xabsiyada, waana awood u gaar ah dalwad goboleedka, sida ku cad qodobka 4aad ee liiska ku lifaaqan Dastuurka Hindiya ee tilmaamaya astaynta awoodaha. Waxay dalwadda federaalku gacan siisaa xukuumadda dalwad goboleedka, si loo horumariyo amniga xabsiyada, tababbarka shaqaalaha iyo dayactirka xabsiyada.

3.4. Ciidanka Booliska

Kolka laga hadlayo federaalaynta Booliiska waa in maanka lagu hayo qaabdhismeedka, shaqaalaysiinta, tababbarka, awoodaha, xilalka iyo wadashaqaynta heerarka kala duwan ee booliiska. Badanaa dunida federaalka, waxaa jira boolis heer federaal ah iyo mid heer dawlad goboleed ah, walow dalalka qaarkood ay leeyihiin hal hay'ad Booliska oo ka shaqaysa dalka oo dhan. Halka kuwa kale ay leeyihiin

saddex heer boolis oo kala ah: heer federaal, heer dawlad goboleed iyo heer deegaan.

Dastuurka Soomalaiya waxa uu dhigayaa in ay jirayaan Boolis federaal ah oo ay maamulayso dawladda federaalka ah iyo boolis hoos imaanaya xukuumadaha dalwad goboleedyada. Wuxuu sidaas oo kale tilmaamayaa in booliska federaalku uu sugayo amniga muwaadiniinta Soomalaiyeed iyo ajaanibta deggan Dalka Soomaaliya; halka booliska dalwad goboleedku uu ilaalinayo nafta iyo hantida dadka deggan dalwad goboleedka. Wuxuu sidaas oo kale tilmaamayaa in uu jirayo iskaashi ka dhexeeya labada heer ee Booliiska[3].

Waxaa jira heshiis u dhexeeyay dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada oo ka dhacay magaalada Baydhabo taariikhdu markay ahayd 16/04/2017, ujeedkiisuna ahaa hannaanka amniga dalka. Heshiiska waxaa ogolaaday Golaha Amniga Qaranka Soomaaliya (Somali's National Security Council) 8dii Maajo 2017. Waxaa heshiiskaas ka dambeeyay heshiiskii amniga (Security Pact) ee 11 kii Maajo 2017 kii lagu qabtay wadanka Ingiriiska, magaalada London intii uu socday shirki la magac baxay "London Conference Somalia 2017.

Heshiiskaas Amniga waxaa ogolaaday oo isku raacay Dawlada Federaalka Somaaliya iyo 42 xubnood oo ka kala socday Beesha Caalamka (International Partners) markii ay taariikhdu ahayd 11 Maajo 2017, maagalada London. Heshiiska Baydhabo ee hannaanka 16/04/2017, waxaa lagu qeexay waajibaadka iyo xilalka ay kala yeelanayaan booliska federaalka iyo kan dalwlad goboleedka.

Inkasta oo heshiiskaas la kala saxiixday, haddana waxaa muuqata kolka la dhuuxo nuxurkiisa in uu yahay mid lagu degdegay, maadaama aan weli wax wadaxaajood ah

[3] Qodobka 126 Qod.126(1) Xukuumadda Federaalku waxay damaanad-qaadaysaa nabadda, gobannimada iyo ammaanka qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo bedbaadinta shacbigeeda, iyadoo la adeegsanaayo adeegyada ciidammada amniga oo ay ku jiraan: (a) Ciidanka xoogga dalka; (b) Nabadsugidda; (c) Ciidanka booliska; (d) Ciidamada Asluubta.(2) Adeegsiga ciidamada amniga waxaa lagu suggaya sharciga loo dejiyey. (3) Ciidammada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa xil ka saaran yahay ilaalinta gobannimada iyo madaxbannaanida Dalka iyo difaaca midnimada dhuleed.(4) Booliska Federaalka xilkiisu waa ilaalinta nolosha iyo hantida, ammaanka iyo nabadgelyada muwaaddiniinta iyo dadka kale ee deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.(5) Ciidanka booliska ee lagu abuuray sharciyada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayada xilkiisu waa ilaalinta nolosha iyo hantida muwaaddiniinta iyo dhawrista xasilloonida iyo ammaanka degaannadooda iyagoo kaligood ah ama kaashanaya ciidammada booliska federaalka. (6) Hay'adaha amniga qaranka oo ah kuwa hubka sita waxaa kormeeraya oo koontaroolaya hay'adaha rayid ah.

laga gelin arrinta awood wadaagga oo udub-dhaxaad u ah xilalka iyo waajibaadka heerarka dawladda oo ay ku jiraan kuwa hay'adaha amniga.

3.5. Qaabdhismeedka Booliiska dawladaha federaalka ah:

Waxaan qaybtaan ku soo qaadanaynaa qaabdhismeed Booliika qaar ka mid ah dawladaha ku dhaqma nidaamka federaalka.

3.5.1. Dalka Bakistaan

Bakistaan waa dal Muslin ah oo ku yaal koonfur bari Asia, wuxuu xoriyaddiisa ka qaatay dalka Ingiriiska 1947. Dastuurkii ugu horreeyay waxaa loo dhigay 1956, hase yeeshee duruufo siyaasadeed iyo afgambiyo ay sameeyeen ciidamada, sidaa oo kala gobolkii bariga Bakistaan (Bangaladheesh) oo ka goosatay Bakistaan inteeda kale, waxaan markale dib loo sameeyay, dalkuna u qaatay dastuur rasmi ah 1973. Bakistaan waa dal ku dhisan nidaamka federaalka, kana kooban 4 dawlad goboleed iyo deegaanno aan dawlad goboleed ahayn oo ay ka mid yihiin caasimadda federaalka, deegaannada qabaa'ilka (Federally Administered Tribal Areas) oo ay dawladda federaalku maamusho. Nidaamka federaalka ee Bakistan waxaa awood ballaaran leh dawladda dhexe, walow ay maamul goboleedyadu ay leeyihiin awoodo lagu qeexay dastuurka. Bakistaan waxay leedahay hal dastuur oo kaliya oo lagu qeexay qaabdhismeedka heerarka dawladda, hay'adaha kala duwan ee dawladda iyo xilalka iyo waajibaadka, mana jiro dastuur u gaar ah oo ay leeyihiin dawlad goboleedyada, maadaama dalka oo dhan uu dhaqangal ka yahay hal dastuur oo loo qaaday afti dadweyne. Cutubka 1aad, qaybta 5aad ee dastuurka ayaa lagu qeexay awoodaha ay wadaagayaan hay'adaha xeerdejinta federaalka iyo kuwa dawlad goboleedyada, waxaana awoodahaas lagu lifaaqay dastuurka dalka. Waxaa sidaas oo kale midaysan xeerarka aasaasiga iyo habraacyada, gaar ahaan Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerka Caddaymaha (Qaanuun-shahaadaat).

Booliiskooda waxaa lagu dhisay Xeerka ku taariikhaysan 1861 oo ah xeerkii uu ku dhaqi jiray Ingiriiskii gumaysan jiray dhulkii la oran jiray Hindiya (sub-continent), hase yeeshe kolkii xorriyadda uu qaatay dalku, la ogolaaday in uu sii jiro iyada oo wax-ka-beddel lagu sameeyay. Waxaa xeerkaas lagu beddelay xeerka ku taariikhaysan sanadkii 2002 (police order), kaas oo dhaqangalay 14/08/2002, kaas oo ah xeerka lagu dhaqo Booliiska dalka Bakistaan.

i. Qaabdhismeedka Booliiska Federaalka:

Xilka iyo waajibaadka booliisku waa sugidda amniga, soo dabbaalidda kala dambeynta, ka hortagga iyo baarista dembiyada, uruurinta xogaha sirdoon iyo waajibaad kale oo sharciga lagu sheegay. Waxaa jira hay'ado kala duwan oo xilkoodu yahay fulinta waajibaadka aan tilmaanay, waxaana ka mid ah hay'adahaas:

1. Hay'adda baarista federaalka (Federal Investigation Agency)[4].
2. Ciidanka ka hortagga daroogada (Anti-Narcotics Force).
3. Booliiska xuduudaha (Frontier Corps).
4. Ciidanka ilaalada xeebaha (Pakistan Coast Guards).
5. Ciidanka raanjariska (Pakistan Rangers).
6. Booliiska waddooyinka waaweyn ee iskaga goosha gobollada dalka iyo kuwa hoose ee qaranka (National Highways and Motorways Police).
7. Booliska garoomada (Airports Security Force).
8. Booliiska caasimadda (Islamabad Police, Islamabad Capital Territory).
9. Akadeemiyadda qaranka ee booliiska (National Police Academy) ama haddii si kale loo dhigo dugsiga tababbarka booliiska qaranka.

Dhammaan qaybaha kala duwan ee booliska iyo hay'adaha baarista waa kuwa heer federaal ah oo ka shaqeeya dalka oo dhan, qayb kastana waxay qabataa hawsha loo asteeyay oo ay awood gaar ah u leedahay, kana fulin karto meel kasta oo ka mid ah dhulka Bakistaan.

ii. Qaabdhismeedka Booliiska dawlad goboleedyada:

Sida aan sheegnayba dhaqan ahaan mas'uulyadda booliska waxaa leh dawlad goboleedyad, sidaas darteed qaybaha soo socda ayay noqonayaan booliiska dawlad goboleedyadu:

- Booliiska dawlad goboleedka Punjab.
- Booliiska dawlad goboleedka Sindh.

[4] To investigate cases of corruption and fraud in Agency federally controlled departments and institutions. Its jurisdiction encompasses economic crimes, cyber crimes, banking offences, and enforcement of immigration laws/exit control list. Federal Investigation Agency is a border control, counter-intelligence and security agency under the Interior Ministry, tasked with investigative jurisdiction on undertaking operations against terrorism, espionage, federal crimes, fascism, smuggling as well as infringement and other specific crimes.

- Booliska dawlad goboleedka Khyber Pakhtunkhwa.
- Booliiska dawlad goboleedka Balochistan.

Dhammaan qaybaha Booliska ee dalka Bakistaan waxay leeyihiin nidaam, qaabdhismeed, xilal, mas'uuliyad iyo dabeecad isku mid ah, dhawr sababood darteed[5]:

1. Waxaa uu xilkoodu yahay soo-celinta kala dambaynta, ka hortagga dembiyada iyo soo qabashada iyo horkenidda eedeysanaha ee caddaaladda.
2. Xeerarka aasaasiga iyo habraacyada dembiyada, sida Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerka Caddaymaha (qaanuun-e-shahadat order) waa kuwa midaysan oo dhaqangal ka ah dalka oo dhan.
3. Guddiga Adeegga Booliska (Police Service of Pakistan) ayaa magacaaba saraakiisha sare ee qaybaha Booliska dawlad goboleedyada, waxaana shaqaalaysiiya, tababbara isla markaasna maamula xukuumadda federaalka. Sidaas darteed dhammaan qaybaha kala duwan ee Booliska Bakistaan waxay leeyihiin tababbar iyo nidam shaqaalaysiin isku mid ah.

3.5.2. Dalka Nayjeeriya

Qodbka 27 Dastuurka Nayjeeriya ayaa dhisaya Golaha Sare ee Booliska oo ka kooban: Madaxweynaha Dalka, Guddoomiyayaasha (governors) dawlad goboleedyada, guddoomiyaha Guddiga Adeegga Booliska iyo Taliyaha guud ee Booliiska.

Awoodaha iyo xilka Golaha Sare ee Booliska waxaa ka mid ah (qod.28): a) Nidaamka iyo maamulka Ciidanka Booliska Nayjeeriya iyo dhammaan arrimaha kale ee la xiriira. Waxaa arrimahaas ka mid ah magacaabidda, anshaxmarinta, shaqo ka saaridda iyo kormeerka iyo koontoroolka xubnaha ciidanka; b) Kormeerka iyo la socodka guud ee ciidanka booliiska Nayjeeriya iyo c)Kala talinta madaxweynaa ee magacaabidda taliya guud ee Ciidanka Booliiska.

Haddaba, haddii aan soo gunaanado federaalaynta nidaamka booliiska, waxaa inoo soo baxaya in dawladaha federaalka qaarkood ay saamayn ballaaran ku leeyihiin

[5] Police organizations in Pakistan (2010), HRCP/CHRI, 10-11.

nidaamka booliiska dalka, sida: Spain, Nigeria iyo South Africa; sidaas oo kale in dalalka qaarkood ay kaalinta dawladda federaalku ay aad u xaddidan tahay ama aad u kooban tahay, gaar ahaan dalalka nidaamkooda federaalku uu yahay mid lammaanan ama konfedereeshinka ah, sida: Switzerland iyo Maraynka. Dhanka kale waxaa jira dalal uu xaddidan tahay kaalinta dawladda federaalka, sida Bakistaan, Hindiya iyo Jarmalka iyo dalal kale. Kolka laga hadlayo la xisaabtan ka Booliska, waxay badanaa dawladuhu ka midaysan yihiin in nidaamka rayidka ah uu la xisaabtamo hay'adaha amniga, gaar ahaan Booliska, waxaa taas qaba Dastuurka KMG ee dalka, qodobkiisa (126(6): "Hay'adaha amniga qaranka oo ah kuwa hubka sita waxaa kormeeraya oo koontaroolaya hay'adaha rayid ah.

4. Federaalaynta Hay'adaha Baarista

Waxaa jira hay'ado u xilsaaran baarista dembiyada oo uu dalku leeyahay, si cadna loogu sheegay shuruucda dalka, waxaana ka mid ah: Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID), Nabad Sugidda Qaranka iyo Xafiiska Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka, sida ku cad Sharci L.81 ee 9 November 1975 ee wax ku kordhinta Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed. Qod.1aad wuxuu dhigayaa *"Laamaha baarista waxaa loola jeedaa laanta baarista dembiyada, Laanta Nabadsugidda Ummadda iyo Xafiiska Hanti-dhorka".*
Marka laga reebo hay'adda sirdoonka oo aan ku jirin hay'adaha fuliya sharciga, sida aan hoos ku faahfaahi doonno, waxay labada hay'adood oo kale baaraan fal-dembiyeed dhacay ama la'isku dayay ama la abuubulay jaadkay doonaan ha noqdaane, iyada oo ay hay'ad kasta si gaar ah u gudanayso awoodda sharcigu u asteeyay, waxayna natiijada baaristooda u gudbiyaan Xafiiska Xeer Ilaalinta si uu u dhaqaajiyo isla-markaana uu u oogo haddii uu ku qanco natiijada, caddeyn iyo marag-muujinnada uu helo.

4.1. Hay'adda Sirdoonka

Hay'adda sirdoonka qaranku waxa ay u xil-saaran tahay uruurinta iyo falanqaynta xogaha sirta ah ee waxtarka u leh amniga qaranka, ciidamada iyo ujeedooyinka siyaasadda dibadda dalka. Nabadsugidda qaranku waxay ahayd qayb ka tirsan booliska iyo qayb kale oo ka tirsan ciidanka xoogga, wixii ka horreeyay 1970 oo laga dhigay hay'ad gaar ah, waxayse markii dambe noqotay hay'ad dano siyaasadeed loo adeegsado, waxaana la siiyay awoodo dheeraad ah oo ka baxsan awoodaha ay qabtaan hay'adaha dirdoonnada dunidu.

Hay'adda sirdoonka qaranku kuma jirto hay'adaha fuliya sharciga, sidaas oo kale malahan baaris gudaha ah, se waxay leedahay uruurinta iyo gorfeynta xogaha sirta ah ee waxtarka u leh amniga qaranka, waxayna xogaha sirdoon ee saamynaya aminiga la wadaagtaa hay'adaha baarista dembiyada oo leh awoodda baarista dembiga, soo qabashada iyo horkeenidda eedeysanaha ee maxkamadda.

4.2. Xafiiska Hanti-Dhawrka Guud ee Qaranka

Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee Qaranku (XHG) waa mid madax bannaan isla markaana leh shakhsiyad Qanuuneed, waxaana awooddiisa, ikhtisaaskiisa iyo xuduudda shaqadiisa xeerinaya sharciga lagu dhisay Xafiiska, iyadoo qodobka 114aad ee Dastuurka KMG uu si mabd'a ahaan ah u tilmaamayo. Qodobka sare ku xusan waxa uu tilmaan guud ka bixinayaa si cadna u sheegayaa in ay jirayaan Labo Xafiis Hanti- Dhawre ee Labada Heer Dawladeed, mana bixinayo wax faahfaahin dheeri ah.

Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee hadda shaqeeyo waxa uu ku dhisan yahay Sharci L.34 ee soo baxay 14 April 1972, ha yeeshee waxaa lagu magacaabay habraac ka duwan kan uu sheegay sharciga sare ku xusan.

Waajibaadka Guud ee Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka waxaa ka mid ah:

1. Waxaa uu mas'uul ka yahay dhammaan baarista dakhliga, kharashaadka, mashaariicda, heshiisyada, hantida (guurtada iyo ma guurtada) iyo daymaha.
2. Waxa uu dabagal iyo xaqiijin ku samayn karaa canshuuraha Dawladda si uu u xaqiijiyo in loo uruuriyo habraaca waafaqsan una adeegaya hal-beegga iyo shuruucda maaliyadeed ee Dalka.
3. Waxa uu baaris sanadlo ah ku samayn karaa Xafiisyada iyo Hay'adaha Dawladda iyo wakaaladaha madaxabannaan isagoo raacsiin karaa baaristiisa warbixin marka uu u soo gudbiyo Wasiirka Maaliyadda Dalka.
4. Haddi ay u soo baxdo in uu jiro fal xadgub maaliyadeed ah ama uu dhacay fal dembi ah waxa uu warbixinta baaristiisa u gudbinayaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si waafaqsan Qod. 15, 16 ee Sharci L.34/72, waxaana dhaqajinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud si waafaqsan Qod.69, 70, 71 XHC marka uu hubiyo, xaqiijiyo in falka loo hayo caddeymo iyo marag-muujinno ku filan, haddii loo waayana waxa uu dib ugu celinayaa XHG, haddii uu markale keeni waayo caddeymo waxaa la owdayaa Dacwadda.

5. Waxaa kale uu XHG awood u leeyahay dhaqaajinta dacwadaha xisaabaadka isagaana u gudbinaya Maxkamadda Sare ee Dalka, waana in dacwaddu waafaqsanaato xeerka maamulka iyo xisaabaadka, si waafaqsan Qod.10/5 iyo 11/4aad ee sharci L. 3 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka 1962 iyo Qod.12aad ee sharci L.34/72.

4.3. Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID)

Hoggaanka Baarista Dembiyadu waa waax farsamo oo ka mid ah qaybaha Booliska Soomaaliya, sida uu qeexayo Xeerka Nidaamka Booliska[6]. Xeerkani ma faah-faahinayo waaxyaha, qaybaha iyo laamaha uu u sii kala baxayo hoggaan kasta. Booliska Soomaaliya waa ciidanka ugu faca weyn ciidamada qalabka sida ee dalka, waxa uu leeyahay saddex iyo toban hoggaan oo uu ka mid yahay Hoggaanka Baarista Dembiyada[7] .

Hoggaanka Baarista Dembiyadu waxa uu ka mid yahay fadhiyada madaxa bannaan oo taliska ku xiran, wuxuuna hoos yimaadaa Hoggaanka Hawlaha. Waajibaadka iyo xilalka Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID) waxaa ka mid ah:

1. Baarista dembiyada waaweyn sida ku cad Qod.23aad ee Xeer L.2 ee 23/12/1972 Xeerka Ciidanka Booliska Soomalaiyeed. Sidaas oo kale ka hortagga iyo baarista dembiyadaas.
2. La talinta habka & farsamada baarista Dembiyada.
3. Bixinta shahaadooyinka dembi la'aanta & warbixinnada ku saabsan shahaadooyinka aadaabta & Akhlaaqda.
4. Ka warhaynta & la socodka dhaqdhaqaaqa dembiilayaasha & habka ay dembiyada u galaan.
5. Ururinta & isku dubbaridka tirada dembiyada dalka ka dhaca.
6. Aqoonsiga & Baafinta Dembiilayaasha & Alaabta la aqoonsan karo oo la xado.
7. Kaydinta faraha, Raadka, sawirrada & tilmaamaha dembiilayaasha.
8. Wuxuu sidaas oo kale awood uu ku baaro dembiyada loo arko in ay khatar yihiin, sida dilka, dhaca, kufsiga, dembiyada lidka ku ah qarannimada ee ku qeexan Qod. 184-239 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliy iyo kuwa kale.

[6] Organisation of the Police Force, Law No.2 of 23 December 1972, Chapter 4, Article 18
[7] Qaab-dhismeedka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Radio Muqdisho, 21 December 2017, oo laga heli karo: https://radiomuqdisho.so/akhriso-qaab-dhismeedka-ciidanka-booliiska-soomaaliyeed/

5. Wakaaladaha Amniga iyo Baarista ee Dalalka Federaalka ah

Wakaaladda amnigu waa hay'ad dawladeed oo qabata hawlo sirdoon oo la xiriira amniga gudaha dalka. Waxay la mataan tahay hay'adaha sirdoonka dibadda ee dalku leeyahay, waxa ay qabataa hawlo ay ka mid yihiin ka hortagga iyo la dagaallanka hawlaha basaasnimo iyo sirdoon ee hay'adaha sirdoonka shisheeye iyo xilal kale oo ay ugu mudan baarista dembiyada waaweyn ee qaranka lidka ku ah ama kuwa sharcigu u asteeyay.

Tusaale: Dalka Maraykanka, Xafiiska Dembi Baarista Federaalka (*Federal Bureau of Investigation*) wuxuu qabtaa hawlo sirdoon, amni iyo sharci fulin; halka hay'adda Sirdoonka Maraykanka ee loo yaqaan "*Central Intelligence Agency (CIA)"* uu xilkeedu yahay uruurinta xogaha sirdoon ee dibadda. Si taas la mid ah Hay'adda Sirdoonka Ingiriiska ee lagu magacaabo "*MI5"* waxay la tacaamushaan khataraha amniga gudaha Ingiriiska, dhanka kale hay'adda "*MI6"* ee isla Ingiriisku waxay ka hortagtaa khataraha dibadda ee lidka ku ah qaranka Ingiriiska.

Dalka Pakistaan wuxuu leeyahay hay'adda sirdoonka qaranka oo loo yaqaan "*Inter-Services Intelligence (ISI)*", xilkeeduna yahay sirdoonka dibadda; halka Wakaaladda dembi baarista Federaalka ay tahay hay'adds koontoroosha xuduudaha, sidaa oo kale baarta dembiyada, ka hortagta wakaaladaha kale ee sirdoonnada shisheeye, waana wakaalad amni, waxayna hoostagtaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Bakistaan. Awoodaha kale ay leedahay waxaa ka mid ah awoodo baariseed, hawgallo lagula dagaallamayo argagixisada, basaasnimada, dembiyada federaalka iyo gaboodfallada kale ee sharcigu u asteeyay in baarto.

Dalka Hindiya waxaa jira wakaalad sirdoon oo lagu magacaabo "*the Research and Analysis Wing*(RAW)" oo ah hay'adda sirdoonka dibadda, waxaa soo raaca *"Central Bureau of Investigation (CBI)"* oo xilkeedu yahay baarista dembiyada waaweyn, sida musuqmaasuqa, dembiyada dhaqaalaha, internetka iyo teknoloojiyada iwm, waxayna awooddeedu ku kooban tahay heer federaal, hase yeeshee waxay baaris ku samayn kartaa dembiyada ka dhaca dawlad goboleedka kolka ay ogolaashiyo ka hesho Maxkmadaha ama dawlad goboleedka ay dembiga ka baarayso. Waxaa dhanka kale jiro hay'ad lagu magacaabo "*The National Investigation Agency (NIA)"* oo xilkeedu yahay la dagaallanka iyo ka hortagga falalka argagixisada. Waxa ayna awood u leedahay in baaris ku samayso falka aksta lala

xiriirinayo argagixiso oo dhaca dalka, iyada oo aan wax ogolaansho ah uga baahnayn dawlad goboleedka ama dawladda federaalka ama Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Ministry of Home Affairs).

Waxaa dhici karta in la is weydiiyo farqiga u dhexeeya shaqada Booliska qaranka iyo wakaaladaha amniga ee aan ka soo hadalnay. Sida aan ku soo xusnay tusaalaha hore, FBI Maraykanku waa hay'ad u dhiganta *booliska qaranka* ama *Federaalka*, sidaas oo kale ku shaqa leh amnigii gudaha iyo ka hortagga sirdoonnada shisheeye. Halka dalalka kale ee dunida ay kala soocan yihiin shaqooyinka wakaaladaha amniga iyo shaqada Booliska, mid kastana uu leeyahay shaqooyin gaar ah oo uu sharcigu u asteeyay, balse ay ka dhaxayso wadashqayn iyo isku xirnaan.

Dalalka aan kor ku soo sheegnay iyo kuwa kale ee duniduba waxa ay leeyihiin hay'ado baariseed ama sirdoon ama amni oo u xilsaaran dembiyo gaar ah, iyada oo la eegayo hadba culayska dembiyadaas. Waxaa intaa dheer in xubnaha ka shaqeeya wakaaladaha amniga qaarkood ay yihiin madani (civil) halka kuwa kale ay yihiin ciidan (military ama paramilitary), sidaas oo kale madaxdu wax ay noqon karaan rayid iyo ciidan labadaba, hase yeeshee waxaa marwalba jira xiriir ka dhexeeya sirdoonka ciidanka iyo hay'adaha amniga rayidka ah.

5.1. Hay'adda Amniga vs Booliska Dharcadda ah

Waxaa jira dooda badan oo ka taagan in wakaaladahaa amniga loo qaabeeyo sida Boolisk dharcadda (secret ploice) ah, sidaas oo kale hawlaha ay kala qabanayaan iyo jihada magacabaysa ama la xisaabtamaysa. Waxaa la is weydiin karaa sida hay'adaha amniga loogu adeegsan karo hawlgallo sir ah oo gudaha dalka ah, si loogu gaaro dano siyaasadeed ama loogu qabsado nidaamka dawladda.

Hawgallada ay qabtaan Booliska dharcadda qaarkood, waxaa ka mid noqon kara faragelinta, is-hortaagga dhaqdhaqaaqa iyo carqaladaynta ururrada mucaaradka ah, isku dayga in la sumcad-dilo ama la dilaba ama loo xiro si ka baxsan sharciga ama la shirqoolo. Waxaan ku tusaalayn karnaa hay'adaha amniga ay samaystaan kelitaliyayaashu, sida Hangashtii iyo hay'addii nabadsugidda ummadda Soomaaliya oo loo adeegsan jiray dhibaataynta dadka dawladda ka aragtida duwan, mararka qaarna ay dhici jirtay in la khaarijiyo ama si sharci darro loo xiro.

Dalalka qaar, waxaa hay'adaha amniga xakameeya isla markaasna la xisaabtama hay'adaha garsoorka iyo xeerdejinta; halka dalalka qaar ay u hogaansamaan amarada hal hogaamiye ama guddi fulin iwm.

Haddaba, waxaan halkaan si kooban ugu soo gudbinayaa dhawr dal hay'adaha baarista dembiyada dhawr dal oo ay ka mid ah Maraykanka iyo Bakistan.

5.2. Xafiiska Dembi Baarista Federaalka ee Maraykanka (Federal Bureau of Investigation)

Xafiiska dembi Baarista federaalku waa hay'adda dembi baarista ugu weyn dalwadda federaalka Maraykanka. Waa hay'adda sirdoonka iyo amniga gudaha Maraykanka, waxayna mabada'ahaan ka mid tahay hay'adaha ilaaliya sharciga. Waxa uu xafiisku mas'uul ka yahay baaritaanka kiisaska la xiriira dembiyada federaalka ama ku xadgudubka xeerarka federaalka, haddii aan arrintaas awood gaar ah loo siin wakaaladaha kale ee baarista dalwadda dhexe ee Maraykanka, looguna xilsaaray gudashada xilkaas ama fulintiisaba. ***FBI*** waxay ka tirsan tahay ama hoos tagtaa Waaxda Caddaaladda Maraynka, wixii warbixin baariseed ahna waxay u gudbisaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maraykanka, kaaliyayaasha iyo wakiillada Xafiiska ee Maxkamadaha Degmada ee Federaalka. Inkasta oo ay FBI tahay hay'ad federaal ah, haddana ma ahan ciidan boolis qaran ama hay'adaha sharciga meelmariya oo mabada'ahaan hoostaga dawlad goboleedyada iyo dalwadaha hoose (states and local government).

Waxay xubin ka tahay hay'adaha Sirdoonka Maraykanka ee lagu magacaabo bahda sirdoonka Maraykanka (U.S. Intelligence Community), waxayna si la mid ah Xafiiska Xeer Ilaalinta warbixinteeda la wadaagtaa Agaasimaha Amniga Qaranka[8]. Shaqada FBI waxay la mid tahay hawlaha ay qabtaan hay'adaha kale ee baarista dunida, sida MI5 Ingiriiska, NCA New Zealand, GCSB iyo FSB Raashka iyo CIA

[8] The director of national intelligence (DNI) is a senior, cabinet-level United States government official, required by the Intelligence Reform and Terrorism Prevention Act of 2004 to serve as executive head of the United States Intelligence Community (IC) and to direct and oversee the National Intelligence Program (NIP). All IC agencies report directly to the DNI. The DNI also serves, upon invitation, as an advisor to the president of the United States, the National Security Council and the Homeland Security Council on all intelligence matters. The DNI, supported by the Office of the Director of National Intelligence (ODNI), produces the President's Daily Brief (PDB), a top-secret document including intelligence from all IC agencies, handed each morning to the president of the United States.

isla Maraykanka, kuwaas oo aan ka mid ahayn hay'adaha sharciga fuliya, balse awoodda saara xogaha sirdoon ee dibadda.

5.2.1. Qaab-dhismeedka iyo Waajibaadka

Xarunta dhexe ee xafiiska FBI wuxuu ku yaal caasimadda dalka ee Washington, D.C. waxay sidaas oo kale hay'addu in kabadan 50 xafiis ku leedahay magaalooyinka waaweyn ee Maraykanka, sidaas oo kale waxay boqollaal xarumood oo guuguura ku leedahay meelo kala duwan, kuwaas oo loo yaqaan wakaaladaha deggan iyo dhowr iyo toban xarumood isgaarsiineed oo ay ku leedahay dalal shisheeye, si ay u fududeeyaan xog isdhaafsiga hay'adaha shisheeye ee la xiriira dembiyada caalamiga ah iyo dembiilayaasha.

5.2.2. Dembiyada uu Baaro Xafiiska

Xafiisku wuxuu awood u leeyahay baarista dembiyada federaalka ah ama haddii si kale loo dhigno dembiyada federaalka oo ka dhasha ku xadgudubka xeerarka federaalka, gaar ahaan xeerarka dembiyada iyo ciqaabta federaalka oo ay soo hoos galayaan in kabadan 200 qaybood oo ay ku jiraan[9]:

- Dembiyada internetka ama electronic (cybercrime).
- Dhaca khiyaanada iyo dhagarta (embezzlement) ah[10].
- Dhaca ama burcadda bankiyada.
- Dembiyada argagixisada (terrorism).
- Dembiyada abaabulan (organized crime).
- Burcad badeedda iyo afduubka diyaaradaha iyo maraakiibta (piracy and hijacking).
- Khiyaamada qaran (treason).
- Qaran dumiska.
- Fallaaganimada.
- Musuqmaasuqa.
- Basaasnimada.
- Ka ganacsiga daroogada.

[9]https://www.justice.gov/doj/organization-mission-and-functions-manual-federal-bureau-investigation #:~: text= The%20FBI's%20mission%20is%20to,%2C%20espionage%2C%20and%20cyber%20operations.https://oig.justice.gov/reports/FBI/a0626/final.pdf.

[10] Waa isdabamarin xirfadaysan oo si bareer ah qofka hantidiisa ama lacagtiisa looga qaato

- Kuwa kale.

Waa hay'adda mas'uulka ka ah ka hortagga basaasnimada, waxay matashaa golaha sirdoonka qaranka Maraykanka oo ah hay'ad uu dhisay golaha amniga qaranka Maraykan ee hoostaga Madaxweynaha Dalka. Arrimaha la xiriira amniga gudaha, FBI ayaa mas'uul ka ah isku xirka xogaha iyo sirdoonka iyo la wadaagidda wakaaladaha kale ee federaalka[11]. Waxay sidaas oo kale baartaa xadgudubyada xeerka xuquuqda rayidka ee federaalka, sida midab takoorka iyo cunsurinimada shaqada, codbixinta, xadgudubyada iyo arxan darrada ay gaystaan xubnaha booliiska. Iyada oo u marayso barnaamijkeeda warbixinta midaysan ee dembiyada ayay hay'addu si sanadle ah u daabacdaa warbixin kooban oo ku saabsan dembiyada ka dhacay gudaha Maraykanka; waxay sidaas oo kale soo saartaa warbixin gaar ah oo ku saabsan dembiyada nacaybka (hate crimes) ku salaysan[12].

Waxay hay'addu uruurisaa caddaymaha dacwadaha madaniga ee dawladda Maraykanku qayb ka tahay ama laga yaabo in ay qayb ka noqoto, waxay sidaas oo kale baartaa dadka loo qaadanayo jagooyinka xasaasiga ah ee xukuumadda federaalka. Waxay awood u leedahay baarista dembiyada lagu galo dalka dibaddiisa ee lidka ku ah muwaadiniinta Maraynka ama danaha Maraykanka, sida safaaradaha, hase yeeshee soo qabashada qofka ajinabiga ah ee dhul shisheeye, waxaa la ogol yahay marka Koongareeska (labada aqal ee sharci dejinta) Maraykanku u siiyo awood ama marka uu ogol yahay dalka qofka laga soo xirayo.

Falsafadda baariseed ee FBI-du waxay xoogga saartaa ama ku qotontaa in xiriir dhaw la yeelato xogahana la wadaagto dawladda federaalka, dawlad goboleedyada iyo dawladaha hoose, sidaas oo kale hay'adaha sharci fulinta iyo kuwa sirdoon. Tiro aad u badan oo ka mid ah baarisyada FBI-da ayaa waxaa la sameeyaa iyada oo la kaashanayo hay'adaha sharci fulinta ama iyada oo qayb ka ah kooxda shaqo wadaag (joint task forces).

[11] https://www.britannica.com/topic/Federal-Bureau-of-Investigation.
[12] https://en.wikipedia.org/wiki/Federal_Bureau_of_Investigation.

FBI waxaa hrtebinta ugu weyn u leh[13]**:**

1. In laga ilaaliyo isla markaasna laga difaaco Maraykanka weerarrada argagixisada.
2. In Maraykanka laga ilaaliyo hawgallada sirdoonnada shisheeye, basaasnimada iyo ellectorooniga (cybercrimes).
3. La dagaallanka dembiyada internetka ee khatarta ah.
4. La dagaallanka musuqmaasuqa (boolida qaran) iyo fasaadka guud (xatooyada xoolaha dadweyne) nooc kasta oo uu yahay.
5. Ilaalinta xuquuqda madaniga.
6. La dagaallanka dembiyada white crime ka sida. *Khiyaannada iyo wax isdaba-marinta warqadaha maaliyadeed, khiyaannada bankiyada iyo shirkadaha waaweyn ama dhacooda, lacag dhiqidda iwm.*
7. La dagaallanka iyo ka hortagga dembiyada waaweyn.

5.3. Wakaaladda baarista Federaalka ee Bakistaan (Federal Investigation Agency Bakistaan)

Wakaaladda dembi baarista federaalka ee Bakistaan waa hay'adda koontoroosho xuduudaha, waxay baarta dembiyada, waxay la dagaallantaa wakaaladaha kale ee sirdoonnada ajnabiga, waa wakaalad amni, waxayna hoostagtaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Bakistaan. Awoodaha kale ay leedahay waxaa ka mid ah awoodo baariseed, hawgallo lagula dagaallamayo argagixisada, basaasnimada, dembiyada federaalka iyo gaboodfallada kale ee sharcigu u asteeyay in ay baarto.

5.3.1. Qaybaha wakaaladda

Wakaaladda dembi baarista federaalka ee Pakistan waxay leedahay 11 waaxood oo shaqaysa oo baarta isla markaana sharciga horgaysa demniilayaasha:

1. Waaxda la dagaallanka musuqmaasuqa(anti-corruption)
2. Waaxda la dagaallanka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka (Anti-Human Trafficking and Smuggling).
3. Waaxdaa dagaallanka argagixisada (Counter-Terrorism).
4. Dembiyada ganacsiga (Economic Crime).

[13] https://en.wikipedia.org/wiki/Federal_Bureau_of_Investigation.

5. Dembiyada elektarooniga, gaaska, saliidda, gaar ahaan xatooyadooda (Electricity, Gas, Oil Anti-Theft Unit).
6. Xarunta Akadeemiga (FIA Academy).
7. Socdaalka (Immigration).
8. Waaxda Interbool (Interpol).
9. Ilaalinta hal-abuurka maskaxeed (Intellectual Property Rights).
10. Nidaamka maamulka xuduudaha isku-dhafan (Integrated Border Management System).
11. Jawaabaha Qaranka ee Xarunta la dagaallanka dembiyada elektarooniga ama dembiyada internetka (National Response Center for Cyber Crimes).

5.3.2. Xilka iyo shaqada waaxaha

1. Garabka la dagaallanka argagixisada: waa koox mas'uul ka ah in ay ka difaacdo Bakistaan nooc kasta oo argagixiso ah: mid internet, mid kiimiko ah, mid bayoolaji ah iyo mid nukleer intaba.
2. Garabka la dagaallanka mususmaasuqa: wuxuu baaraa dhammaan musuqmaasuqa hay'adaha dawladda, sidaas oo kale wuxuu la dagaallamaa nooc kasta oo musuqmaasuqa ah.
3. Garabka la dagaallanka Dembiyada Dhaqaalaha: wuxuu Ilaaliyaa xuquuqda hal abuurka maskaxeed ee Bakistaan, sidaas oo kale ilaalinta amniga dhaqaalaha dalka.
4. Garabka Socdaalka (Immigration Wing): La dagaallanka socdaalka sharci darrada ah ee Bakistan iyo la dagaalanka ka ganacsiga dadka.
5. Garab Farsamo (Technical Wing). Wuxuu gacan ka geystaa baaritaanka dambiyada teknoolojiyadda sare, wuxuuna Bakistaan ka ilaaliyaa basaasnimada shisheeye iyo hawlgallada sirdoonka ajnabiga ah.
6. Laanta Sharciga (Legal Branch): Waxay ilaalisaa xuquuqda madaniga ah waxayna bixisaa hagitaan sharci ah oo ku saabsan dhammaan arrimaha maamulka iyo hawlgalka.
7. Xafiiska Dhexe ee Qaranka (National Central Bureau): Wuxuu ka caawiyaa Interpol ka iyo Xafiiska Baarista Federaalka ee Mareykanka la dagaalanka ururada dambiyada caalamiga ah
8. Unug ka-hortagga ka ganacsiga dadka (Anti-Trafficking Unit). Wuxuu u xilsaaran yahay la-dagaallanka dembiyada waaweyn, hubinta ka ganacsiga

dadka ee waddanka oo dhan, iyo sidaa oo kale ka hortagga iyo ilaalinta dhibanayaasha tahriibka.

6. Gunaanadka

Dalku wuxuu leeyahay ciidamo difaac oo xilkoodu yahay difaaca xuduudaha qaranka, iyo ilaalinta midnimadiisa dhul, waa ciidan u taagan ka hortagga cadawga shisheeye ee dibadda uga soo duulaya dalka ama cadawga hubaysan ee gudaha dalka weerarka iyo dagaalka ka wado. Dunida oo dhammi waxay ka midaysan tahay in ciidanka difaacu noqdo mid heer qaran ah, maamuulkiisana uu hoostago dawladda dhexe. Waxaa dhanka kale jira hay'ado amni oo u xilsaaran amniga gudaha dalka, kuwaas oo waajibkoodu yahay la dagaallanka, ka hortagga iyo ka dabatagga fal dembiyeedyada ka dhacay dalka gudihiisa. Hay'adaha mas'uuliyaddaas loo asteeyay waxaa ka mid ah booliska oo waajibkiisu yahay ilaalinta amniga muwaadiniinta iyo dadka ku nool dalka gudihiisa. Waxaa sidaas oo kale jira hay'ado sirdoon oo dalku leeyahay, xilkooduna yahay uruurinta iyo gorfaynta xogaha sirdoon ee danta u ah qaranka ama lidka ku ah amniga dalka.

Dunida federaalka, waxaa uu dalku leeyahay hal hay'ad sirdoon oo noqonaysa hay'ad qaran oo federaal ah, mana jirayaan hay'ado sirdoon oo leh awood ay ku soo uruuriyaan ama ku baaraan xogaha sirta ah ee dibadda. Dalalka Federaalku waxay leeyihiin ciidan boolis oo labo heer ah, heer dawladda federaalka iyo heer dawlad goboleed. Waxaa jira dalal booliskoodu u dhisan yahay saddex heer oo kala ah: heer federaal, heer dawlad goboleed iyo heer dawlada hoose ama deegaan. Waajibaadka booliiska federaalku waa fulinta xeerarka federaalka ah iyo la sugidda amniga dalka, sharciga ayaana nidaaminaya awoodaha uu yeelanayo; sidaas oo kale waxaa jiraya boolis heer dawlad goboleed ah oo xilkiisu yahay fulinta xeerarka dawlad goboleedka, waxaana waajibaadkiisa lagu qeexaa xeerarka.

Dalka federaalka qaarkood, waxay leeyihiin guddiyo u xilsaaran adeegga booliska, shaqadooduna tahay maamulka, tababbarka iyo kormeerka hay'adaha booliska heerarkooda kala duwan, waxay sidaas oo kale nidaamiyaan qaabdhismeedka, tababbarrada, shaqo qorista iyo adeegyada kale ee uu u baahan yahay booliska. Labada heer booliska waxa ka dhexeeya wadashaqayn iyo iskaashi dhan walba leh. Dalalka federaalku waxay leeyihiin hay'ado baara dembiyada waaweyn, sidaas oo kale uruuriyo xogaha dembiilayaasha, magacyo kala duwan ayay leeyihiin hay'adaha

noocaas ahi, hase yeeshee waxay ka midaysan yihiin baarista dembiyada loo yaqaan dembiyada federaalka; halka ay jiri karaan hay'ado kale oo gaar ah oo loo xilsaaro baarista iyo la dagaallanka dembiyo dabeecad gaar ah leh oo loo aqoonsaday in ay khatar gaar ah leeyihiin ama ay u baahan yihiin farsamo baariseed gooni ah.

Dhanka kale, waxaa jiraya hay'ado baariseed oo heer dalwad goboleed ah oo ka hoos shaqeeya hay'adaha booliska dawlad goboleedka, xilkooduna yahay baarista dembiyada aan loo aqoonsanayn kuwa federaalka, sida: dilka, dhaca, kufsiga, xatooyada, been abuurka, handadaadda iwm. Awoodaha ay kala yeelanayaan hay'adaha baarista heerarkooda kala duwan, waxaa qeexaya xeerarka, waxayna aalaaba ku xiran tahay hadba heerka dawladeed ee awoodda sharci u leh xeerka la jebiyay ama ku xadgudubay.

Soomaaliya, waxay la mid tahay dalalka federaalka ee aan sare ku sheegnay, walow ay lahayd hay'ado baaris oo hoostegi jiray xukuumadda dhexe, maadaama dalku haystay nidaamka dawladda dhexe, waxaana hay'adahaas ka mid ah CID, Xafiiska Hanti-dhawraha Guud iyo Hay'adda Nabad Sugidda qaranka oo shaqadeedu ahayd in baarto siraha dibadda ee qaranka lidka ku ah, hase yeeshee laga weeciyay waqtigii ciidanku xukumayay dalka, ahaydna hay'ad lagu caburin jiray dadka ka aragtida duwanaa nidaamki waqtigaa jiray.

7. Talo Soo Jeedin

Waxaan halkaan ku soo gudbinayaa talooyin aan u arkay in ay muhiim u yihiin qaabdhismeedka hay'adaha amniga, gaar ahaan hay'adaha baarista dalka oo ya ka mid yihiin:

- In dalku yeesho hal ciidan difaac qaran oo hoostaga Wasaaradda Gaashaandhigga ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.
- In ay jirto hal hay'ad sirdoon oo heer qaran ah, xilkeeduna yahay uruurinta iyo falanqaynta xogaha sirta ah ee waxtarka u leh amniga qaranka, ciidamada iyo ujeedooyinka siyaasadda dibadda dalka.
- In ciidanka boolisku ay noqdaan labo heer oo kala ah: heer federaal iyo heer dawlad goboleed, si waafaqsan Qod.126 ee Dastuurka KMG, hase yeeshee la dhiso guddi lagu magacaabo: "*Guddiga adeegga Booliska*", kaas oo noqonaya guddi isku dhafan, xilkiisuna yahay midaynta nidaamka tabbarka, shaqo

qorista, dallacsiinta, xaqsiinta, anshax-marinta dhammaan xubnaha booliska heerarkooda kala duwan.

- In ay jirto hay'ad baaris federaal ah oo leh qaabdhismeed u gaar ah, rayid ah isla markaasna aan hoostagayn hay'adaha kale ee amniga, gaar ahaan booliska. Magacabidda agaasinka hay'addaasina ay la mid noqoto agaasimaha hay'adda nabad sugidda iyo taliyayaasha ciidanka qalabka sida.
- In hay'addaasi ay yeelato saddex awoodood oo kala ah: awood sirdoon gudaha ah, awood amni sugid iyo awood baaris intaba, ayna la mid noqoto xafiiska dembi baarista federaalka (FBI) Maraykanka ama wakaaladda dembi baarista federaalka ee Bakistaan ee aan sare ku soo sheegnay. Awoodaheeda baaristana ay ka mid noqdaan kuwaas soo socda:
    - ✓ Baaritaanka dambiyada gaarka ah iyo kuwa abaabulan.
    - ✓ Demiyada socdaalka iyo ka hortagga tahriibka.
    - ✓ La socodka iyo koontoroolka xuduudaha uu dalku la wadaago dalalka shisheeye.
    - ✓ Ka-hortagga tahriibinta iyo ka ganacsiga dadka
    - ✓ La-dagaalanka argagixisada iyo burcad badeedda.
    - ✓ La dagaallanka Lacag-dhaqidda iyo musuqmaasuqa.
    - ✓ Nidaamka Aqoonsiga Sawirka Faraha ee oo tamaatigga ah.
    - ✓ Xuquuqda hal abuurka maskaxeed (intellectual property).
    - ✓ Xiriirka Interpol.
    - ✓ Xogta Dembiyada Qaranka.
    - ✓ Dhaca khiyaanada iyo dhagarta (embezzlement) ah[14].
    - ✓ Dhaca ama burcadda bankiyada.
    - ✓ Ka hortagga falalka basaasnimada ee sirdoonnada shisheeye.
    - ✓ Burcad badeedda iyo afduubka diyaaradaha iyo maraakiibta (piracy and hijacking).
    - ✓ Khiyaanada qaran (treason).
    - ✓ Ka hortagga iyo wax ka qabshada isku dhacya-xuduudeed ee maamul goboleedyada.
    - ✓ Ururinta iyo isku dubbaridka tirada dembiyada dalka ka dhaca.
    - ✓ Kaydinta faraha, raadka, sawirrada iyo tilmaamaha dembiilayaasha.

[14] Waa isdabamarin xirfadaysan oo si bareer ah qofka hantidiisa ama lacagtiisa looga qaato

- ✓ Baarista xadgudubyada hay'adaha booliiska iyo ciidamada ee lidka ku ah muwaadiniinta.
- ✓ Baarista dembiyada lidka ku ah shisheeyaha ku sugan dalka gudihiisa ama dibaddiisaba.
- ✓ Baarista dembi kasta oo loo arko in qaranka lid ku yahay.

- In dawlad goboleedyadu yeeshaan hay'ado baariseed hoostaga booliska dawlad goboleedka, isla markaasna ay baaraan dembiyada ka soo hara kuwa loo xilsaaray hay'adda baarista federaalka, sidaas oo kale ay samaynsan karaan xarumo dembi baaris, sida CID iwm.
- In hay'adda baarista dembiyada Federaalka ay si toos ah warbixinta dembiyada ula wadaagayso Xafiiska Xeer Ilaalinta Qaranka iyo Maxkamadaha Federaalka ee dacwadda ikhtisaaska u leh.
- In xogaha amniga gudaha iyo warbixintooda ay hay'adda baarista dembiyada federaalku u gudbiso Xafiiska Madaxweynaha JFS iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.
- In hay'addaan ama wakaaladdaan dawladdu u qoondayso miisaaniyad gaar ah oo ay ku fuliso hawlaha loo xilsaaray.
- In dawladdu ka shaqayso helitaanka shaybaarka lagu baaro faraha, dhacaannada iyo farsamooyinka forensigga iwm.
- In hay'adaha amniga qaranka oo ah kuwa hubka sita ay kormeeraaan isla markaasna ay koontaroolaan hay'adaha rayid ah.

Tixraac:

1. Bamford, James (2007-12-18). Body of Secrets: Anatomy of the Ultra-Secret National Security Agency. Knopf Doubleday Publishing Group. ISBN 978-0-307-42505-8.
2. Security agency Definition". Law Insider. Retrieved 2022-05-24.
3. A Counterterrorism Role for Pakistan's Police Stations by Robert Perito and Tariq Parvez (Special Report, August 2014).
4. Constitition of India.
5. Constitution of Islamic Republic of Pakistan.
6. Police Act, 1861.
7. Police Order, 2002.
8. Azam, Farooq, Human Trafficking, Human Smuggling and Illegal Migration to and from Pakistan (2009).
9. "Official website of Central Bureau of Investigation (CBI)". cbi.gov.in.
10. "Interpol to hold general assembly in India in 2022". The Economic Times India. 18 October 2019.
11. Central Bureau of Investigation, Government of India. 2010. pp. 31–50.
12. https://en.wikipedia.org/wiki/Central_Bureau_of_Investigation.
13. https://www.svpnpa.gov.in/images/npa/pdfs/MOU/MoU_NIA_040522.pdf.
14. https://vault.fbi.gov/.
15. https://www.fbi.gov/investigate.
16. Rhodes, Lorna A. (2001-10-01). "Toward Anthropology of Prisons". Annual Review of Anthropology. 30 (1): 65–83.
17. Kaeble, Danielle; et al. (2016). "Correctional Populations in the United States, 2015". Bureau of Justice Statistics: 1–20.
18. https://www.ojp.gov/ncjrs/virtual-library/abstracts/prison-systems-and-correctional-laws-europe-united-states-and-japan
19. https://en.wikipedia.org/wiki/Prisons_in_Germany.
20. https://scholarlycommons.law.northwestern.edu/cgi/viewcontent.cgi?article=2459&context=jclc.